

- Waaxda Cadaalada Maraykanka; 1-800-514-0301
- Guddiga Maraykanka ee u Sinaanta Shaqaalaynta iyo Fursada; 1-800-669-3362 ama
- Wasaarada Beeraha Maraykanka, Adeegaha Cuntada iyo Nafaqada (midab sooc lagu sameeyo maareynta Barnaamijka Caawimaada Nafaqada Dheeraadka ah).

USDA, Director of Civil Rights,  
1400 Independence Avenue, S.W.  
Washington, D.C. 20250-9410  
1-800-795-3272 (cod)  
202-720-6382 (TTY)

Waa in aad la xariirid wakaalad kasta si aad u xadidid wakhtiga saxda ah ee loo baahanyahay in aad samaysid faylasha cabashooyinka. In aad u dirtid fayl cabasho dhinaca Qaybta Wax baarista Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ma bedelayso wakhtiyadan xadidan.

Haddii aad usoo dirtid fayl cabasho dhinaca Qaybta Wax baarista, shaqaalaha ayaa xadidi doona maxkamada kadibna kula soo xiriiri doona.


Haddii ay suurto gal tahay, shaqaalaha Qaybta Wax baarista waxay baaritaan ku samayn doonaan cabashada kadibna waxay gaari doonaan natiijo.

Waaxdu waxay samayn doontaa isku day kasta si loo saxo oona looga takhaluso ficilada xiriirka la leh midab takoorka.

## Aargoosi

Sharciyada federaalka iyo dowlada iyo siyaasada Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada waxay mamnuucayaan aargoosi. Qofkasta oo diro fayl cabasho midab takoor ah ama dad ku caawiya baaritaanka lagu sameeyo cabashada midab takoorka lama cabsin karo, looma hanjabi karo, lama cadaadin karo, ama laguma samaynayo midab sooc.

PLACE  
STAMP  
HERE



WASHINGTON STATE DEPT OF SOCIAL & HEALTH SVCS  
HUMAN RESOURCES DIVISION  
INVESTIGATIONS UNIT (IU)  
PO BOX 45830  
OLYMPIA, WA 98504-5830



# Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada Siyaasada Midab takoor la'aanta

## Buuggyarahan:

- Waxaa ku qoran macluumaad guud oo ku saabsan siyaasada Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada' ee khuseysa midab takoor la'aanta, fursada loo simanyahay iyo nidaamyada la maro marka laga cabanayo midab takoorka.
- Wuxuu sharxayaa adeegaha ay heli karaan dadka aaminsan in lagu midab soocay shaqaalaynta iyo keenida adeega.



Transforming lives

DSHS 22-171 SM (Rev. 2/17) Somali

## KA CABASHADA MIDAB TAKOORKA

**LA XIRIIR:** Investigations Unit Administrator  
 Grievance Coordinator for Section 504,  
 Title II and Other Civil Rights Laws  
 Department of Social and Health Services  
 Human Resources Division  
 Investigations Unit (IU)  
 PO Box 45830  
 Olympia WA 98504-5830

COD: (360) 725-5821 ama 1-800-521-8060  
 TTY: (360) 586-4289 ama 1-800-521-8061  
 FAKIS: (360) 586-0500  
 IIMAYL: iraucomplaints@dshs.wa.gov

MAGACA QOFKA SAMEYNAYA CABASHADA	LAMBARKA TELEEFOONKA	CINWAANKA BOOSTADA
WADDADA	MAGAALADA	GOBOLKA FURAHA DEEGAANKA

MAGACA IYO DARAJADA QOFKA ADIGA KUGU SAMEEYAY MIDAB TAKOORKA	LAMBARKA TELEEFOONKA
URURKA	MAGAALADA GOBOLKA FURAHA DEEGAANKA

Midab takoorku wuxuu ku  
 saabsanaa:
   
 Shaqaalayn  
 Adeeg

Asalkeed aaminsantahay in uu ku tiirsanaa midab takoorka laguugu sameeyay?

Fadlan sheeg waxa dhacay iyo goorta ay dhacday (isticmaal bogg(boggag) dheeraad ah haddii loo baahdo ***kadibna sixix kuna qor taariikhda bogg kasta***):

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

---

SIXIIAAGA	TAARIKHDA
-----------	-----------

## Siyaasada

Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada ee Gobolka Washington waa fursad shaqo loo simanyahay mana ku midab soocayso dadka aasaas ku dhisan da', nooc, jihayn galmo, labb iyo dhedignimo, aqoonsi nooc/fikrad dhiibasho, xaalad guur, jinsi, caqiido, midab, asal dhallasho, diin ama waxa uu qofku aaminsanyahay, aaminsanaan fikrad siyaaso, xaalad ciidan, halyeeynimo hore oo si sharaf leh looga fadhiistay, Casrigii Fiitnaam, hadda kala tagsan ama xaalado halyeeynimo hore oo la ilaalay, jiritaanka naafu xaga dareenka, maskaxda, jirka ah ama in la isticmaalo eey loo tababaray hagid ama adeeg xayawaan uu adeegsado qof naafu ah, lagac bixin loo simanyahay ama macluumaad hido ama fir ah.

Dhaqamada cadaalad darada ah ee lagu sameeyo keenida adeega ama shaqaalaynta, kuwaas oo ku salaysan arimaha kor lagu soo sheegay, waxay ku xad gudbayaan Siyaasada Midab takoor la'aanta Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada. Qaar kamid ah dhaqamadaan waxay yihiin:

- Diidista adeegaha ama dheefaha.
- Diidis shaqo siin ama dalacin.
- In la keeni waayo turjumid munaasab ku ah adeegaha, ay kamid tahay Luuqada Dadka Indhoolayaasha ee Maraykanka (ASL).
- Helid xadidan oo adeegaha ah midaas oo ay sabab u tahay in aan la geli karin gudaha xarumaha.
- In la diyaarin waayo goobo la joogo si loogu oggolaado kasoo qayb gal buuxa oo dadka naafada qabba ay ka qayb galaan dhammaan barnaamijyada, hawlaha iyo adeegaha.
- In la diido fursada ah in la ahaado sida lataliye ama qof iskaa wax u qabso ah ama loo adeego jaaliyadaha iyo guddiyada.

## Cabashooyinka Midab takoorka

Haddii aad aaminsantahay in lagu midab takooray, buuxi foomka cabashada midab takoorka ee ku jira gadaasha buuggyarahan kadibna u dir dhinaca Maamulaha Qaybta Baaritaanada, Iskuduwaha Cabashada ee Qaybta 504, Cinwaanka II iyo Sharciyada Kale ee Xuquuqaha Rayidka, Qaybta Xogaga Bani'aadamka, Qaybta Wax baarista. Haddii aad ogtahay midab takoor ku salaysan arimaha hore loo soo sheegay, la xiriir Qaybta Wax baarista. Sida waafaqsan sharciyada federaalka iyo dowlada, sidoo kale adiga waxaad fayl cabasho u diri kartaa dhinaca:

- Guddiga Xuquuqaha Bani'aadamka Gobolka Washington;  
1-800-233-3247
- Waaxda Adeegaha Bani'aadamka iyo Caafimaadka Maraykanka, Xafiiska Xuquuqaha Rayidka; 1-800-362-1710 (In loo diro fayl cabasho Qaybta Wax baarista kaama celinayso in aad fayl cabasho u dirtid dhinaca Xafiiska Xuquuqaha Rayidka).